



# Melbourne Airport Environs Overlay

Waa maxay Melbourne Airport Environs Overlay sida ay  
wax u yeellayso hantidayda?

Melbourne Airport Environs Overlay (MAEO) waa qorshaynta xakamaynta ay soo rogtay Xukuumada Fiktooriya 2007 si loo xakameeyo saamaynta dhawaaqa diyaarada ay ku yeellanayso guryaha u dhow Madaarka Melbourne.

MAEO wuxuu ka tarjumaa siday u yaalliiin afarta dhabo oo diyaaraduhu ka duulaan ama ka degaan Naqshada Weyn ee Madaarka Melbourne ee 2018. Cusboonaysiinta MAEO waxay khusayn doontaa gurya ka badan intii hore, kuwaas oo ku yaalla degmooyinka Brimbank, Hume, Melton, Moonee Valley, Moreland iyo Whittlesea.

Haddii MAEO ay khusayso gurigaaga, waxaa laga yaabaa inay saamayso waxaad gurigaaga ka samaynayso. Guri kasta oo horay loo dhisay looma baahna in wax laga bedelo. Haddii aad qorshaynayso dhismayaal cusub, la hadal golahaaga degmada wixii ku saabsan sida MAEO ay wax ugu dhimayso waxaad qabanayso. Ka dhaafid xadadan ayaa khusaysa ogolaanshaha dhismaha aan weli dhicin ee guriga iyo dalabyada ogolaanshaha la soo gudbiyey.

MAEO waa la cusboonaysiin karaa mar labaad si ay uga muuqato qorshaha guud ee mustaqbilka dhismaha Madaarka Melbourne. Guryaha qaarka aanay saamayn dib wax uga qabshadada MAEO waxaa laga yaabaa inay saamayn karto mustaqbilka.



Haddii aad u baahan tahay caawimo, fadlan la xiriir Adeega Tarjumida Qoraalka Iyo Afcelinta (TIS) wixii caawima ah oo afcelinta iyo tarjumida. Kala xiriir TIS National Tel: 131 450 (Australia gudaheeda) ama booqo [www.tisnational.gov.au](http://www.tisnational.gov.au)